



Ogow Xuquuqdaada: Waxa aad ka Qabsan karto Minnesota Haddii aadan Sharci lahayn



Warqadan xogta aruursan ah waxaa loogu talagalay dadka aan sharci lahayn. Taa macnaheedu waa in aadan haysan wax sharci ah oo ay bixiso laanta socdaalku (immigration) ama warqado sharci ah si aad ugu noolaato United States. Waxa ay ka hadashaa xaquuqdaadda iyo waxyaabaha aad ka qabsan karto Minnesota. Waxa ayna haysaa akhbaar ku saabsan:


- Helida laysinka gawaarida ama Aqoonsiga Gobolka (ID)
- Guursiga ama furiinka
- Tagida maxkamadaha si ilmahaaga laguugu xukumo
- Shaqeynta iyo lahaanshaha ganacsi
- Helida dhamaan lacagta aad shaqeysatay
- Bixinta canshuuraha iyo furashada akoon bangi
- Helida daryeel caafimaad
- Lahaanshaha ama kiraysiga guri
- Dhigashada Jaamacad
- La macmiltanka hay'adaha sharci ilaalinta

Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).



Laysinka Darawalka iyo Aqoonsiga Gobolka (ID)

Waad qaadan kartaa laysinka darawalka iyo aqoonsiga gobolka (ID).



Haddii aadan sharci lahayn, waa aad heli kartaa laysinka darawalka ama aqoonsiga gobolka (ID) Minnesota. **Uma baahnid sooshal sakuurati si aad u hesho laysinka darawalka.** Tag xafiiska Darawalka iyo Adeegyadda Gawaarida (DVS) si aad u codsato laysinka darawalka. Xafiiska Darawalka iyo Adeegyadda Gawaaridu lama wadaagi wax akhbaar ah laanta socdaalka (immigration) iyo Ilaalinta Kastanka (ICE).

Si aad u hesho laysinka darawalka, waa khasab inaad:

- Keento 2 aqoonsi oo cadeeya cidda aad tahay. Kuwaa waxaa ka mid noqon kara, dal-ku-gal (passpart), aqoonsi qunsiliyadeed (ID), warqad dhalasho, ama xaashi nikaax
- Qaadato imtixaanka aqoonta iyo imtixaanka darawalnimada
- Ku baasto imtixaan araga ah
- Sawir lagaa qaado **iy**o
- Bixiso khidmad.



Hel Akhbaar badan.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan oo ka hadasha talaabooyinka la qaado si loo helo laysinka darawalka. Mari koodka QR (QR code) ama gal: lawhelpmn.org

Waa aad yeelan kartaa gaari.



Haddii aad haysato laysinka darawalka, waa aad geli kartaa caymiska gaariga. Haddii aad haysato caymis gaari, waa aad laahan kartaa gaari uu adiga magacaagu ku qoran yahay. Waa ay wacan tahay in waxa ugu badan ee magacaaga ku qornaan karaa ay ku qornaadaan. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ka hadasha waxa la sameeyo kolka la gadanayo gaari duug ah. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/how-buy-used-car-dealer



Guurka, Furiinka, iyo Ilmaha

Waa aad guursan kartaa.



Waa aad ku guursan kartaa Minnesota haddii aadan sharci lahayn. Uma baahnid lambarka sooshal sakuuratiga si u hesho warqadda nikaaxa.

Waa aad guursan kartaa qof kale oo aan sharci lahayn. Waa aad guursan kartaa qof kale oo sharci leh (ku leh sharci uu ugu noolaan karo wadanka Intied States).




Hel Akhbaar badan.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xoga aruursan oo ka hadasha sidda lagu helo warqada nikaaxa iyo hadii uu guurku saameeynayo sharcigaaga. Mari Koodka QR (QR code) ama gal: lawhelpmn.org

Guurkaaga ka dhaca wadan kale waa uu ka sharciyeysan yahay United States.

Haddii guurkaaga ay aqoonsan tahay dowladdi ama nidaam sharci ah oo meel kale oo aad ku guursatay ka jiray, waxay u badan tahay guurkaagu inuu sharci ka yahay United States. Waxaa u dhici karta inaad u baahato inaad keento warqadda nikaaxa.

Waa aad Heli kartaa Furiin.



Haddii aad ku guursatay wadanka United States, waa aad ku furi kartaa qof wadanka United States. Haddii aad ku guursatay wadan kale, waa aad ka heli kartaa furiin United States. Haddii xilahaagu uu kaaga xareeyey codsi laanta socdaalka (immigration) kaa oo wali hawshiisu ay socoto, furiinku waxa uu joojin karaa hawshaa. Tani ma ay keeni in lagu masaafuriyo.



Hel akhbaar badan.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ka hadasha waxa macnaheedu yahay in si sharci ah la isugu guursado ama la isugu furo Minnesota. Mari Koodka QR (QR code) ama gal:

lawhelpmn.org

Waa aad tagi kartaa maxkamad si aad uga qaybgasho kiis ilmo haysato ah.



Haddii ilmo ay kuu joogaan aadna is furtaan waalidka kale, adiga iyo xilaha kale ee aad is furteen waa khasab inaad go'aansataan cidda ilmaha haysanaysa. Haddii aad ku heshiin waydaan cidda ilmaha haysanaysa, waxaa dhici karta in xaakim uu arintaa idiin go'aamiyo.

Haysashada ilmaha waxaa go'aansata maxkamadda qoyska, ee ma ay go'aamiso maxkamada laanta socdaalka. Xaakimyaddu waa ay kala duwan yihiin. Xaakimadda maxkamadda qoysku waxa ay eegaan masraxada ilmaha. Xaakimadda maxkamadda qoysku uma adeegsadaan sharci la'aanta waalidka si lid u ah iyaga. Xile hore oo sharci ku leh wadanku waxaa dhici karta inay isku dayaan inay sharci la'aantaada awgeed kuugu caji-jugleeyaan adiga. **Waxa aad xaq u leedahay inaad ka qaybgasho kiisaska haysashada ilmaha ah haddii aadan sharci lahay.**



Tusaale ahaan: Elena iyo gabadheeda

Elena sharci ma leh. Waxa ayna is furayaan ninkeeda, Eduardo. Eduardo waxa uu ku yiri Elena hadii aadan gabadhayda i siin, waxa aan kuu sheegi hay'ada Laanta socdaalka (immigration) iyo Ilaalinta Kastanka (ICE). Xaakimka maxkamadda qoysku uma shaqeeyo laanta socdaalka. Xaakimku waxa uu ka fakaraa uun waxa u roon gabadha. Xaakimku uma uu sheegi doono hay'ada ICE uma uu adeegsan doono sharci la'aanteeda si iyada liddi ku ah. Elena waa inay tagtaa maxkamada qaadaysa cidda loo xukumi haysashada ilmaha.

Hel akhbaar badan.



Maxkamadaha Minnesota waxa ay hayaan foomam ku caawin kara haddii aad dalbanayso **haysaho ilmo iyo waqti waalid ilmahiisa la qaato**. Waxaa kaloo jira foomam loogu talagalay bedelida amarka horey u jiray ee haysiga ilmaha ama waqtiga waalidku ilmaha la qaadanayo ku saabsan. Mari koodka QR (QR code) ama gal barta: lawhelpmn.org



Barta LawHelpMN waxa haysaa xog aruursan oo ka hadasha **aabayaasha doonaya inay helaan xaquuqdooda waalidnimo, go'aansiga ilmo haysashada, iyo waxa ay aabayaashu sameyn karaan si ay waqti ula qaataan ilmahooda**. Mari koodka QR (QR code) ama gal khadka: lawhelpmn.org



Shaqeysiga iyo Lahaanshaha Ganacsi

Waa aad lahaan kartaa ganaci.



Ganacsiyada Minnesota intooda badani kuma qori doonaan shaqo hadii aadan cadeyn karin inaad ka haysato ogolaansho dowladda si aad u shaqeyso. Tan waxaa la yiraa helida “ogolaansho shaqo.” Cid walbaa ma ay heli karto warqad shaqo.


Waxa aad bilaabi kartaa ganacsi aad adigu leedahay haddii aadan sharci lahayn. Uma baahnid warqad ogolaansho shaqo ah ama lambar Sooshal Sakuurati si aad uga bilowdo ganacsi Minnesota. Iyadoo hadba ku xiran nooca ganacsiga, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad codsato laysin gaar ah si aad cunto u gado ama aad u isticmaasho qalab gaar ah.



Tusaale ahaan: Ganacsiga Nadiifinta ah ee Carla

Carla sharci ma leh waxa ayna rabtaa inay si sharci ah ay u shaqeysato. Uma baahna laysin gaar ah si ay u bilowdo ganacsi nadaafada ah. Waxa ay bilaabi kartaa ganacsiga waxa ayna si sharci ah ugu shaqeysan kartaa iskeed. Carla waa inay ka bixiso canshuur lacagta ay kasbato.

Waxa aad xaq u leedahay inaad hesho dhamaan lacagta aad shaqeysato.



Shaqadaaddu waa khasab inay ku siiso dhamaan lacagta aad shaqeysato. Taa macnaheedu waa:

- Waa khasab inay ku siiyaan ugu yaraan lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo saacadii ee uu sharcigu dhigayo:
- Waa inay ku siiyaan jeega lacagta ee kuugu dambeeya haddii shaqadda aad ka tagto ama lagaa eryo.
- Waa khasab inay ku siiyaan lacagta dheeriga ah ee shaqada hadii aad shaqeyso in badan 40 saac asbuucii aadna saacad ku shaqeyso. Barta (LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo sharaxda cida heli karta lacagta dheeriga ah ee shaqada Gal khadka: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/overtime)
- Ma ay xadi karaan lacagta bakhshiishka ah.
- Kuma ay waydiisan karaan inaad shaqeyso “iyadoon lacag kuu socon.”

“Xatooyada lacagta shaqadu” waa marka shaqadaaddu aysan ku siin dhamaan lacagtii aad shaqeysatay. Waydiiso shaqadaadu inay ku siiso lacagta aad ku leedahay. Haddii ay maya yiraahdaan, waxa aad xaq u leedahay inaad soo sheegto xatooyada aadna hesho lacagtaada. Tan waa aad sameyn kartaa xataa haddii aadan sharci lahayn. Qalada shaqadaadu waxa ay kugu dhihi karaan waa lagu masaafurin haddii aad dowladda u sheegto xatooyo lacag shaqo. **Taasi run ma aha. Soo sheegidu ma ay kuu keeni in lagu masaafuriyo.** Haddii qoladda shaqadu aysan ku siin dhamaan lacagtii aad shaqeysatay, qoladda shaqadaadu kolkaa waxa ay jabinaysaa sharciga.

Si aad u soo sheegto xatooyo lacag shaqo:

- Ka wac Waaxda Shaqada iyo Ganacsiyada ee Minnesota (Minnesota Department of Labor and Industry) khadka ah (651) 284-5075 [ama](#)
- Ka wac Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Minnesota (Minnesota Attorney General's Office) khadka ah (651) 296-3353.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo kaa caawin karta inaad hesho lacagta aad ku leedahay shaqo hore. Gal khadka: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/my-old-job-owes-me-money-wage-claims

Canshuurta & Akoonada Bangiyada

Waxa aad heli kartaa Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha Shakhsiga ah (ITIN).

Haddii aadan haysan sooshal sakuurati lambar, waxa aad heli kartaa Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Canshuur-Bixiyaha ah (ITIN). Kani waa lambar aad ka heli karto Hay'ada Adeega Dakhliga Gudaha (IRS). **Waxaa aad isticmaali kartaa ITIN intii aad isticmaali lahayd lambarka sooshal sakuuratiga si aad u xareysato canshuur aadna u furato akoon bangi.** Si aad u hesho ITIN, buuxi foomka W-7. (ka hel foomka W-7: irs.gov/forms-pubs/about-form-w-7) Boostada ugu dir foomka iyo warqada dhalashada ciwaankan:

Internal Revenue Service
Austin Service Center
ITIN Operation
P.O. Box 149342
Austin, TX 78714-9342

Waxa aad furan kartaa akoon bangi waana aad qaadan kartaa kaarka amaahda (credit card).



Haddii aadan sharci lahayn, waa aad furan kartaa akoon bangi waana aad qaadan kartaa kaar amaah. Bangiyo badani iyo shirkadaha kaararka amaahdu waxa ay ku waydiin lambarkaaga sooshal sakuuratiga (social security). Qaar ka mid bangiyada iyo shirkadaha kaararka amaahdu waxa ay kuu ogol yihiin inaad isticmaasho Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Canshuur-Bixiyaha ah (ITIN) si aad u furato akoon. Haddii bangi ama shirkad kaararka amaahda bixisaa ay ku tiraa waa khasab inaad lambarka sooshal sacuurati haysato, tag bangiyo kale. Soo hel bangi kuu ogolaada inaad isticmaasho ITIN.

Waa aad bixin kartaa canshuur.



Haddii aad shaqeyso, waa inaad canshuur bixiso. Ka xaree canshuurta hay'ada Adeegyada dakhliga gudaha (IRS) sannad walba. Hay'ada IRS lama wadaagto akhbaarta Laanta Socdaalka (immigration) Iyo Ilaalinta Kastanka (ICE). Waa aad isticmaali kartaa **Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Canshuur-Bixiyaha ah (ITIN) halkii aad ka isticmaali lahayd lambarka sooshal sakuuratiga si aad u xareyso canshuur, xataa haddii aysan taa la mid ahayn lambarka sooshal sakuuratiga ee ku qoran jeegta dabadooda.** Haddii canshuur laga jaray jeega aad shaqeysato, waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato in lacag lagu soo celiyo. Canshuur xareyntu waa ay caawin kartaa qaar ka mid ah kiisaska laanta socdaalka. Waxaa jira barnaamijyo kaa caawin kara inaad ku xareyso canshuurtaada bilaash. Ka ogow wax badan oo taa ah mareegta: prepareandprosper.org and revenue.state.mn.us/free-tax-preparation-sites.

Kaarka Caafimaadka



Waxa aad heli kartaa kaar caafimaad.

Kaarka caafimaadku waxa uu bixiyaa qaar ama dhamaan daryeelkaaga caafimaad. MinnesotaCare waa barnaamij ka caawiya dadka Minnesota inay helaan kaar caafimaad. Waxa uu ka caawiyaa dadka danyarta ahi inay ku bixiyaan lacag jaban helida kaar caafimaad. Laga bilaabo bisha Janaayo 2025 dadka aad sharciga lahayni waxa ay heli karaan kaarka caafimaadka ee la yiraa MinnesotaCare.



Hel akhbaar badan.

Shabakada Waaxda Adeegyada Bulshaddu (Department of Human Services) waxa ay ka hadashaa kaar caafimaad oo ay geli karaan dadka aan ahayn muwaadiniintu U.S. Mari koodka QR ama gal:

mn.gov/dhs/people-we-serve/



Gadashada ama Kiraysiga Guri

Waa aad gadan kartaa guri.



Uma baahnid inaad lahaato sharci si aad u yeelato guri. Waa aad yaalan kartaa guri haddii aadan sharci lahayn. Haddii xilahaaga uu leeyahay sharci uuna ku qoran yahay mulkiga gurigu xilahaasi, xilahaagu waxa uu waydiisan karaa bangigu inuu ku daro magacaaga warqada mulkiga guriga. Uma baahnid inaad wadanka sharci ku lahaato si aad u yeelato guri.

Waa ay adkaan kartaa inaad hesho deyn aad ku gadato guri haddii aadan sharci lahayn. Bangiyadda intooda badani waxa ay waydiin dadka sooshal sakuurati. Qaar ka mid bangiyaddu waxa ay ogolaadaan inaad isticmaasho Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Canshuur-Bixiyaha ah (ITIN) si aad dayn uga qaadato.

Waa aad kiraysan kartaa guri ama qowlad.



Waa aad geli kartaa heshiis guri kiraysi (lease) oo magacaaga ah. Ma aha inaad qof kale la degto. Haddii qoladda guriga lahi ama shirkadi tiraa guri kaama kiraynayno, isku day inaad ka kiraysato guri cid kale.



Hel akhbaar badan.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ka caawisa dadka kiraysanaya guri ay ku noolaadaan inay fahmaan xaquuqdooda dhanka sharciga ah. Mari kooda QR (QR code) ama gal barta: lawhelpmn.org



Jaamacad

Waa aad dhigan kartaa Jaamacad.



Waad aad dhigan kartaa kuleej ama jaamacad haddii aadan sharci lahayn. Jaamacaddu kuma ay waydiin doonto inaad la wadaagto akhbaartaada sharciga (immigration) wadanka aad ku leedahay kolka aad codsato ama aad iskuulka bilowdo. Jaamacadahu uma sheegaan dadka Laanta Socdaalka (immigration) Iyo Ilaalinta Kastanka (ICE).

Waxaa dhici karta inaad hesho caawin bixinta kharashka jaamacada ah



Sharciga la yiraa Sharciga Hamiga Minnesota (Minnesota Dream Act) waxa uu ka caawiyaa dad aan sharciga lahayn inay bixiyaan kharashka jaamacada. Xaq ayaad u leedahay gargaarka uu fidiyo Sharciga la yiraa Sharciga Hamiga Minnesota (Minnesota Dream Act) haddii:

- Aadan sharci lahayn
- Aad ka dhigatay iskuul Minnesota ugu yaraan 3 sanno aadna
- Ka baxday dugsi sare ama aad ka qaadatay shahaadada GED Minnesota.

Sharciga Hamiga Minnesota (Minnesota Dream Act) waxa uu kuu ogol yahay:

- Inaad ku bixiso khidmad jaban jaamacadaha iyo kuleejooyinka dowladda ee Minnesota
- Hesho gargaarka dhaqaale ee ardayda Minnesota ay helaan
- Ka hesho gargaar dhaqaale jaamacadaha iyo kuleejka Minnesota
- Dalbo daymaha ardayda ee gobolka Minnesota. (Ma heli kartid deymaha ardayda ee dowladda dhexe si ay kaaga caawiso bixinta kharashka jaamacadaha haddii aadan sharci lahay.)



Hel akhbaar badan.

Xafiiska Tacliinta Sare (Office of Higher Education) waxa uu hayaa xog aruursan oo ku saabsan Sharciga Hamiga ee Minnesota (Minnesota Dream Act). Mari kooda QR (QR code) ama gal: ohe.state.mn.us



La Macmiltanka Hay'adaha Ilaalinta Sharciga

Waa aad wici kartaa 911 helina kartaa caawimaad.



Haddii aad dareento amaan-darro, ama dab ka kaco guriga, ama aad u baahan tahay daryeel caafimaad, ama ay ku haysato xaalad degdeg ah waxa aad wici kartaa 911. Waxaa aad ka heli kartaa caawimaad bilayska, dab-damiska iyo shaqaalaha gurmada degdega ah. Magaalooyin badan, waa sharci-darro in shaqaalaha gurmada degdega ahi ay ku waydiiyaan inaad sharci leedahay iyo in kale.

Waxa aad ka heli kartaa caawimaad qareen.



Sharciyadda dambiyaddu cid walba isku si ayuu u qabtaa hadii aad sharci (immigration) leedahay iyo haddii kale (sharci lagu joogo wadanka U.S.). Haddii lagu xiro dambi nooc kastaba ah noqdee, waxa aad xaq u leedahay qareen. Haddii aad danyar tahay waxaa aad heli kartaa qareen lacag la'aan ah. Qareenka bilaashka ahi waa qareen lacag la'aan ah oo maxkamaddu magacowdo.

Waxa aad codsan kartaa turjubaan.



Waxa aad xaq u leedahay inaad kula hadasho bilayska afka aad jeceshahay inaad isticmaasho. Haddii bilaysku uusan ku hadlin afkaaga, codso turjubaan telefanka kuugu turjumo.

Waxa aad xaq u leedahay in si xaq ah laguula dhaqmo.



Haddii bilaysku uu ku joojiyo:

- U sheeg bilayska magacaaga. HA u sheegin magaca been ah. Waxaa lagugu soo oogi karaa dambi kale.
- Tus Laysinkaaga darawalka ee Minnesota. Haddii aadan haysan mid, tus dal-ku-galkakaga (passport) ama aqoonsi kale (ID).
- Ka jawaab su'aalaha ku saabsan xawaaraha aad gaariga ku waday. HA ka jawaabin wax su'aalo ah oo kale ama su'aalo aadan fahmin. Ha ka jawaabin su'aalo ku saabsan sharciga aad wadanka ku leedahay.
- Haddii ay bilaysku ku waydiistaan inay baaraan gaarigaaga ama ay ku xiraan waydii inaad la hadasho qareen.
- **Waydii, "Ma xirnahay? Ama xor ma u ahay inaan baxo?"**

Haddii lagu xiro sababtu si kastaba ha noqotee:

- Waa aad ka gaabsan karaa inaad wax tiraa.
- Ha ka jawaabin su'aalo ku saabsan sharciga wadanka aad ku leedahay.
- Waydiiso qareen inaad hesho.



Hel akhbaar badan.

Ururka ACLU waxa uu bixiyaa talooyin ku saabsan la hadalka hay'adaha sharci ilaalinta. Mari kooda QR (QR code) ama gal: aclu.org/know-your-rights/immigrants-rights

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.